

Sida kaalmo looga dalbado cabasho baaraha CIS

TALAABTA 1aad

Isku day in aad si toos ah ul xaliso adeega dhalashada Maraykanka iyo Socdaalka (USCIS)

Ka hor inta aadan weydiisan kaalmo cabasho baaraha, marwalba isku day in aad marka hore dhibaatada la xaliso USCIS adiga oo:

- U soo gudbinaaya su'aalaha kiiskaaga USCIS una sii marsiinaya:
 - Akoonkaaga internetka ee USCIS ee <https://egov.uscis.gov/casestatus>
 - Codsii elektaroonik ah ee <https://egov.uscis.gov/e-Request>
 - Weydii Emma
- Ka Wac xarunta xariirka USCIS 1-800-375-5283
- Kala xariir lockboxsupport@uscis.dhs.gov ciladaha la xariira sanduuqa xiran (lockbox) ama refugeeaffairsinquiries@uscis.dhs.gov ciladaha la xariira hab nidaaminta qaxootiga
- Su'aalaha kale oo dhan, booqo <https://uscis.gov/about-us/contact-us>

TALAABTA 2aad

Codsigaaga kaalmada kiiska ku soo gudbi internetka www.dhs.gov/cisombudsman adiga oo soo raacsiinaya dokumiintiyada cadeeynaya

Hadii aad kaalmo weydiisatay cidda kugu matasha kongareeska, fadlan sug jawaabtooda ka hor inta aadan nala soo xariirin si aad uga baaqsato soo gudbin ku celis ah.

Waxaan si adag u door bideeynaa in aad isticmaasho foomka Khadka internetka ee **DHS Form 7001, Codsiga Caawimaada Kiiska.**

Hadii aadan codsigaaga ku soo gudbin Karin Khadka internetka, waxaad soo degsan kartaa foorka waraaqda ah ee bogeenaa nooguna soo dir:

Email: cisombudsman@hq.dhs.gov

U soo dir : Office of the Citizenship and Immigration Services Ombudsman
Department of Homeland Security
Attention: Case Assistance
Mail Stop 0180
Washington, D.C. 20528

- **Hadii aad tahay wakiil sharci**, waa in aad soo raacsiisaa foomka G-28 oo saxiixan, **Wargalinta Diwaangalinta Matalaada ee qareenimo ama Matalid la Aqoonsanyahay.** Waa in ay waafaqsanaato foomka G-28 ee aad u soo gudbisay USCIS ee kiiskaaga.
- **Hadii aad tahay codsaha ama qof naftiisa u codsanaya (ama horay loogu ogolaaday) T, U, VAWA, magangalyo doon, ama xaalad qaxootinimo**, waxaad ku soo xareyn kartaa Khadka internetka, laakiin waa in aad soo raacsiisaa nuqul saxiixaaga "khad qoyan" (aan aheyn-elektaroonik) gudaha qeybta ogolaashaha. Hubi in USCIS ay haysato cinwaankaaga saxda ah. Booqo www.uscis.gov/addresschange warar ku saabsan sida loo badalo cinwaankaaga.

TALAABTA 3aad

Ka dib marka aan helno codsiga kaalmada kiiskaaga, waxa aanu:

- Kuu soo diri email xaqiijin ah oo wata lambarka codsigaaga Cabashada ee CIS (ama laguu soo dhigo boostada hadii aad qaabkaa codsatay)
- Ku noqo dhameystirnaanta codsigaaga iyo haboonaanta ogolaashaha
- Email ayaad naga heleysaa hadii aan kaaga baahanahay warra dheeraad ah
- Hubi in aynaan helin codsi kan la mid ah
- Baar kiiskaaga si loo ogaado sida ugu haboon ee loo xaliyo arimahaaga
- Waxaan kugu soo wargalin doonaa email ama boostada hadii aan ku caawin karno, sababata aanan kuu caawin Karin, ama hadii USCIS ay qaaday wax talaabo ah si loo xaliyo arimahaga

Ha gafin emaildada muhiimka ah ee kaaga imaanaya xafiiskeena, ku darso liiskaaga xariirka cisombudsman@hq.dhs.gov.

TALAABTA 4AAD

Hadii aan kaa caawin karno arimahaga, waxa aan:

- La xariireeynaa xafiiska USCIS ee ka shaqeeynaya kiiskaaga
- Waxaa aan kugu soo wargalin doonaa email ahaan ama boost ahaan in aan codsigaaga kala xariirnay USCIS
- Si joogto ah ula xariiri doonaa USCIS ilaa inta aan ka helno jawaab xalisa arimahaga
- Waxaan kula soo xariiri doonaa marka USCIS ay xaqiijiso in ay wax ka qabatay kiiskaaga

Warar dheeraad ah Booqo www.dhs.gov/case-assistance

Waxa aad sidoo kale fiirin kartaa Tilmaamaheena Codsashada Dokumeentiyada Kaalmada kiiska ee qaabka ugu wanaagsan ee qaabka ugu wanaagsan ee loo weydiisto kaalmadeena.